

Ujeedada laga leeyahay **karantiilka iyo go'doominta**, waa sidii looga hortagi lahaa faafista feyruska korona.

Goorma iyo maxay?



Is karantiil



Haddii aad sugayso baaritaanka korona ama aad Finland ku soo laabatay oo dalka dibaddiisa ka timid, waxaa lagu soo jeedinayaa in aad is karantiiso.



Karantiil rasmi ah



Haddii aad u nuglaatay feyruska korona. Dhakhtarka cudurrada faafa ayaa amraya in aad karantiil gasho, wuxuuna kuu sheegayaa muddada karantiilka inta ay noqoneyso, sidoo kale wuxuu ku siinayaa wixii kale ee hagsis ah ee arrinkaas la xiriirta.



Go'doomin:




Haddii uu kugu dhacay feyruska korona. Dhakhtarka cudurrada faafa ayaa amraya in aad go'doon gasho, wuxuuna kuu sheegayaa muddada go'doomintu inta ay noqoneyso, sidoo kale wuxuu ku siinayaa wixii hagsis ah ee ku saabsan daryeelka xanuunka.

Maxaan sameeyaa?



Ha la kulmin, hana u dhowaanin dadka guriga ka baxsan.



Bannaanka waad ku soo lugobaxsan kartaa, laakiin waa inaad u jirsataa dadka kale masaafo dhan 1-2 mitir.



Ha aadin dukaanka, shaqada, farmashiyaha ama goobaha hiwaayadda.



Haddii aad isku aragto astaamo la mid ah kuwa feyruska korona, waxaad aaddaa baaritaanka feyruska.

Waa inaad marwalba u hoggaansantaa hagista uu ku siinayo dhakhtarka cudurrada faafa.



Tixgelin gaar ah sii hagista lagu siiyay. Haddii aad guriga jooqto. Sida ugu suurtaggalsan iskaga ilaali in aad u dhowaato ama xiriir istaabasho ah la yeelato xubnaha qoyskaaga.